

# SU'AALAH BADANKA LA IS-WAYDIISYO EE KUSAABSAN CUNTADA DUGSIGA EE BILAASHKA AH IYO TA QIIME DHIMISTA LEH

Gacaliye Waalid/Wakiil:

Carruurta waxay u baahan yihiin cuntooyin caafimaad leh si ay wax u bartaan. **Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis** waxay bixiyaan cunto caafimaad leh maalin kasta. Qiimaha quraacda waa **\$0.00**; qadada waa **\$2.55** dugsiya sare iyo dugsiya dhexe iyo **\$2.35** K-8 iyo dugsiyada hoose. Carruurtaadu waxa dhici karta inay u qalmaan cuntooyin bilaash ah ama qiime dhimis leh. Qiimaha la dhimay waa **\$0.00** quraacda iyo **\$0.00** qadada. Su'aalaha iyo jawaabaha soo socdaa waxay bixin doonaan macluumaad kusaabsan Barnaamijka Cuntada Bilaashka ah iyo Qiime Dhimista leh.

## 1. Aya heli kara cuntooyinka bilaashka ah iyo kuwa qiime dhimista leh?

- Dhammaan qoysaska helaya dheefaha SNAP, FDPIR, ama TANF, waxay mutaysteen cuntooyin bilaash ah.
- Carruurta barbaarinta ee kayar masuuliyadda sharciga ah ee hay'adda daryeelka barbaarinta ama maxkamaddu waxay mutaysteen cuntooyin bilaash ah.
- Carruurta kaqaybqaadanaysa barnaamijkooda Head Start waxay mutaysteen cuntooyin bilaash ah.
- Carruurta buuxisay qeexdinta hooy la'aan, baxsad, ama soo galooti waxay mutaysteen cuntooyin bilaash ah.
- Carruurta waxa dhici karta inay helaan cuntada bilaashka ah ama qiime dhimista leh haddii dhakhliga qoyskaagu uu kujiro xadadka Tilmaamaha Mutaysiga Dakhliga Fadaraalka. Carruurtaadu waxa dhici karta inay u qalmaan cuntada bilaashka ah ama qiime dhimista leh haddii dakhliga qoyskaagu dhaco ama ka hoosee xadadka shaxdan.

Tilmaamaha Mutaysiga Dakhliga ee Qiime Dhimista—Luulyo 1, 2015—Juunyo 30, 2016					
Xajmiga Qoyska	Sannadkii	Bishii	Bishii Laba Jeer	Laba Toddobaad Kasta	Toddobaadkii
1	21,978	1,832	916	946	423
2	29,637	2,470	1,235	1,140	570
3	37,296	3,108	1,554	1,435	718
4	44,955	3,747	1,874	1,730	865
5	52,614	4,385	2,193	2,024	1,012
6	60,273	5,023	2,512	2,319	1,160
7	67,951	5,663	2,832	2,614	1,307
8	75,647	6,304	3,152	2,910	1,455
<b>Xubin qoys oo kasta oo dheeraad ah ku dar:</b>					
	7,696	642	321	296	148

- Sidee ayaan ku ogaan karaa haddii carruurtaadu u qalmaan hooy la'aanta, soo galootiga, ama baxsadda?** Miyey xubnaha qoyskaagu yihiin bilaa cinwaan joogto ah? Ma waxa aad wada joogtaan gabbaad, huteel, ama gurayn kumeel gaadh ah? Qoyskaagu ma u guuraa qaab xilli kusalaysan? Ma jiraan carruur kula nool kuwaasi oo doortay inay ka tagaan qoyskoodii hore? Haddii aad rumaysan tahay carruurta qoyskaagu inay buuxiyeen sharraxaadahan oo aan lagu sheegin carruurtaadu inay heli doonaan cuntooyin bilaash ah, fadlan wax ama iimayl u dir **Homeless, Highly Mobile Services, 1250 W Broadway, Minneapolis, MN 55411; 612-668-5480; [Ryan.strack@mpls.k12.mn.us](mailto:Ryan.strack@mpls.k12.mn.us)**
- Ma u baahanahay inaan buuxiyo dalab ilme kasta?** Maya. Isticmaal mid Dalabka Cuntooyin Dugsiga ee Bilaashka ah iyo Kuwa Qiime Dhimista leh dhammaan ardayda qoyskaaga. Ma oggolaan karno dalab aan dhammaystirayn, markaa hubi inaad buuxiso macluumaadka la rabo oo dhan. Ku soo celi dalabka dhammaystiran: **[magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka]**.
- Ma tahay inaan buuxiyo dalab haddii aan helay warqad sannad dugsiyeedkan dhahaysa carruurtaada in horeba loogu oggolaaday cuntooyinka bilaashka ah?** Maya, laakiin fadlan si fiican u akhri warqada oo raac tilmaamaha. Haddii cid kamid ah carruurta qoyskaagu ka maqnaayeen ogaysiintaada mutaysiga, la xidhiidh **Culinary and Nutrition Services, 812 Plymouth Ave N, Minneapolis, MN 55411; 612-668-2865** isla markaaba.
- Ma ku dalban karaa onlayn?** Ha! Waxa lagugu boorinayaa inaad dhammaystirto dalab onlayn ah halkii dalab warqad ah haddii aad awooddo. Dalabka onlaynka ah wuxuu leeyahay isla shuruudaha dalabka warqadda wuxuuna ku waydiinayaa uun isla macluumaadka dalabka warqadda. Booqo **nutritionservices.mpls.k12.mn.us** si aad u bilawdo ama wax badan uga barato habka dalabka onlaynka ah. La xidhiidh **Culinary and Nutrition Services, 812 Plymouth Ave N, Minneapolis, MN 55411; 612-668-2865** haddii aad hayso su'aalo kusaabsan dalabka onlaynka ah.
- Dalabka ilmahaaga waxa la oggolaaday sannadkii hore. Ma u baahanahay inaan buuxiyo mid cusub?** Haa. Dalabka ilmahaaga wuxuu kaliya shaqaynayey sannad dugsiyeedkaas iyo dhawrka maalmood ee u horreeya sannadkan. Waxa khasab ah inaad soo dirto dalab cusub ilaa dugsigu kuu sheegay in ilmahaagu mutaystay sannad dugsiyeedka cusub.
- Waxaan helaa WIC. Ilmahaygu ma heli karaa cuntooyin bilaash ah?** Carruurta qoysaska kaqaybqaadanaya WIC waxa dhici karta inay mutaystaan cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh. Fadlan soo dir dalab.
- Miyaa macluumaadka aan bixiyey la hubin doonaa?** Haa. Sidoo kale waxa dhici karta inaanu ku waydiino caddayn qoran ee dakhliga qoyska aad sheegto.
- Haddii aanan u qalmin hadda, mar dambe ma dalban karaa?** Haa, waxa dhici karta inaad dalbato marka aad doonto inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Tusaale ahaan, carruurta waalidkood ama wakiilkoodu noqday bilaa shaqo waxa dhici karta inay mutaystaan cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh haddii dakhliga qoysku hoos uga dhaco xadka dhakhliga.
- Ka waran haddii aan khilaaf go'aanka dugsiga ee kusaabsan dalabkayga?** Waa inaad la hadasho saraakiisha dugsiga. Sidoo kale waxa dhici karta inaad codsato dhagaysi adigoo wacaya ama warqad ku hagaajinaya: **Michele Carroll, 812 Plymouth Ave N, Minneapolis, MN 55411; 612-668-2823; ama [Michele.carroll@mpls.k12.mn.us](mailto:Michele.carroll@mpls.k12.mn.us)**.
- Ma dalban karaa haddii qof qoyskayga ka tirsan aanu ahayn Muwaadin Maraykan ah?** Haa. Adiga, carruurtaada, ama xubnaha kale ee qoysku kuma xidhna inaad ahaataan muwaadiniin Maraykan ah si aad u dalbataan cuntooyinka bilaashka ah ama qiime dhimista leh.
- Ka waran haddii dakhligaygu aanu had iyo jeer isku mid ahayn?** Tax xaddiga caadi ahaan aad hesho. Tusaale ahaan, haddii aad caadi ahaan samaysay \$1000 bishii, laakiin aad seegtay woxogaa shaqo ah bishii hore oo aad kaliya samaysay \$900, ka jar qor inaad samaysay \$1000 bishii. Haddii caadi ahaan aad hesho wakhti dheeraad ah, ku dar, laakiin ha ku darin haddii haddii aad mararka qaar uun shaqayso wakhti dheeraad ah. Haddii aad shaqo dhumisay ama saacadahaaga ama mushqaayaddaada la dhimay, isticmaal dakhligaaga wakhtiga.
- Ka waran haddii xubnaha qoyska qaarkood ayna lahayn dakhli ay sheegaan?** Xubnaha qoysku waxa dhici karta inayna helin noocyada qaar dakhliga aanu ku waydiisanayno inaad ku sheegto dalabka, ama waxa dhici karta inayna dakhliga helin habayaraatee. Markasta oo tani dhacdo, fadlan ku qor 0 meesha. Hase yeeshee, haddii meelo dakhli lagu dhaaf bannaan ama madhnaan, kuwaas sidoo kale waxa lagu xisaabin erro. Fadlan ka taxadar marka aad kaga tagayso meelaha dakhliga bannaan, maadaama aanu u qaadan doono inay sidaas tahay.
- Waxaanu kujirnaa milatariga. Miyaanu u sheegnaa dakhligayaga si kale?** Mushaharka aasaasiga iyo gunnooyinkaaga waxa khasab ah in loo sheego dakhli ahaan. Haddii aad hesho wax lacag cad ah oo loogu talagalay guraynta saldhigga, cuntada, ama hu'ga saldhigga ka baxsan, ama aad hesho lacagaha Gunnada Kabka Quudka Qoyska, waxa sidoo kale khasab ah in loogu daro dakhli ahaan. Hase yeeshee, haddii gurayntaada kaqayb tahay Hindisaha Gaaryeelista Guraynta Milatariga, ha ugu darin gunnadaada dakhli ahaan. Waxii kale ee mushahar furineed ee ka imanaya hawlgaalka ciidan sidoo kale waa laga saarayaa dakhliga.
- Ka waran haddii dalabka aanu wada qaadayn qoyskayga?** Ku tax waxii xubno qoys oo dheeraad ah warqad kale, kuna lifaaq dalabkaaga. La xidhiidh **Culinary and Nutrition Services, 812 Plymouth Ave N, Minneapolis, MN 55411; 612-668-2865** si aad u hesho dalab labaad.
- Qoyskaygu wuxuu u baahan yahay caawimo dheeraad ah. Ma jiraan barnaamijyo kale oo aanu dalban karno?** Si aad u ogaato sida loo dalbato SNAP ama dheefaha kaalmo ee kale, la xidhiidh xafiiska kaalmada ee deegaankaaga ama wac **612-596-1300** ama onlayn kaga dalbo **applymn.dhs.mn.gov**.

Haddii aad qabto su'aalo kale ama u baahan tahay caawimo, wac **612-668-2865**.

Si Daacad Ah,

[Signature]